

## Waxyaalaha Mudnaanta u leh Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeedka 2025 (FY25)

Dugsiyada Saint Paul Public Schools (SPPS) waxay sii wadayaan inay qorsheeyaan miisaaniyadda sannad-maaliyadeedka 2025 (FY25). Hannaankaan waxaa ka mid ahaa ka-qaybgalka dadweynaha oo ah ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska gu'gii iyo dayrtii 2023 si looga wadhadlo waxa bulshadeenna mudnaanta u leh waxbarashadooda. In ka badan 10,000 oo qof ayaa ka qayb qaadatay wadhadalkaan. Si aynu u soo koobno waxa aynu maqalnay, fadlan tixraac xogta [Dulmarka Wadhadalka Miisaaniyadda ee Sannad-Maaliyadeedka 2025](#).

### Mudnaanteenna Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeed ee 2025


Iyadoo lagu saleynayo talada aynu idinka maqalnay ka dib markii aad ka-qaybgasheen wadhadalka bulshada ee sannadkan, laba mudnaan ayaa u muuqday inay yihiin kuwa ugu sarreeya xagga muhiimadda:

- 1) kordhinta **dareenka ka mid ahaanshaha iskoolka iyo dareenka amniga ee bulshadeenna**
- 2) si loo xaqiijiyo in **ardayda la ixtiraamo oo metelaaddooda ay ka muuqato** manhajkooda iyo fasalladooda

Tani waxay ka dhigan tahay in SPPS ay mudnaanta siin doonto miisaaniyadda sannad-maaliyadeedka 2025 barnaamijyada iyo adeegyada la xaqiijiyay inay si wanaagsan u saameeyaan waxyaalahaan mudnaanta u leh waxbarashada bulshada.

Intaa waxaa dheer, SPPS waxay aqoonsatay hal dhinac oo leh mudnaanta waxbarasho ee miisaaniyadda sannad-maaliyadeedka 2025: Waana Wax-Akhriska. Xaqiijinta in dhammaan ardayda ay wax akhrin karaan waa aasaaska guusha iskoolka iyo nolosha. Haddii ardaygu ku dhibtoodo inuu wax akhriyo, wuxuu sidoo kale ku dhibtooda barashada xisaabta, sayniska, taariikh iyo juquraafi, ama inuu ardaygu helo xirfadaha iyo aqoonta uu u baahan yahay si uu ugu guuleysto dugsiga sare ka dib.

Saddexdan mudnaanta u leh miisaaniyadda - ee ah amniga iyo dareenka ka mid ahaansho bulshada iskoolka; iskoollo leh ixtiraam iyo metelaad; iyo wax-akhriska - ayaa hagi doono



Saint Paul Public Schools FY25 Budget Priorities



## Waxyaalaha Mudnaanta u leh Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeedka 2025 (FY25)

go'aamada saameynta ku yeelan doono miisaaniyadda sannad-maaliyadeedka 2025. Waxaa muhiim ah in la xasuusto **in degmada SPPS ay filaneyso nusqaan xag miisaaniyadeed ah oo qiyaastii gaareysa \$150 milyan** . Intaa waxaa dheer, waxaa jira kharashyo badan oo loo baahan yahay kuwaasoo ka baxsan saddexdan arrin ee mudnaanta leh oo waana in arrimahaas la maalgeliyaa iyadoo la adeegsanayo ilaha dhaqaale ee la heli karo.

Degmada SPPS waa inay Guddiga Waxbarashada u soo bandhigtaa miisaaniyad isku dheellitiran si loo ansixiyo ugu dambeyn June 30, 2024.

Fadlan nala wadaag taladaada ku saabsan miisaaniyadda sannad-maaliyadeedka 2025 oo gal bogga [spps.org/FY25budget](https://spps.org/FY25budget) ka dibna dabayaaqada January 2024 raadi warkii u dambeeyay ee quseeyo miisaaniyadda bisha soo socota.